SI CAD U QOR
ISTICMAAL KHAD MADAW AMA BULUUKI MADAW AH

DUGSIYADA DADWEYNAHA BOSTON ARJIGA XAASKA EE MUCAAWANOOYINKA CUNTADA

Home Room

SO
rev: 08/15/2011

1 Ardayda ku jirta Dugsiyada Dadweynaha Boston oo QURA

Magacayada idil ee caruurta dhigta Dugsiyada Magaalada Boston oo KELIYA (Magaca Dambe, Magaca Hore, X.Dh.)	Lambarka ID-ga Ardayga	Fasalka	Magaca Dugsiga	"X" haddii ilmaha la kafaalay
				☐
				☐
				☐
				☐
				☐
				☐

2 SNAP ama TAFDC

Haddii qof ka mid ah gurigiinna uu helo SNAP (boonooyinka cuntada) amase taageerada TAFDC, fadlan Lambarka Aqoonsiga ee Hay'adda ee ku qoran xagga sare ee midigta ee warqadda taageerada ee Waaxda Taageerada Ku-meelgaarka (DTA). **Fadlan u-bood Qeybta 6** oo saxeex foomkan haddii aad bixisay Lambar Aqoonsi Hay'ad.

****Ha bixinin lambarkaaga karaka EBT.**

3 Hoylaawe, Qaxooti ama ilmo Baxsad ah

Haddii ilmaha aad wax u-codsaneysaa uu yahay dib-jir amase fakase calaamadi sanduuqa ku haboon ee hoos ku yaalla oo wac Mary William at (617) 635-8037 si ay kuu sii caawiso. Intaas waxa dheer, waa inaad si dhammeystiran u-buuxisaa codsigan si laguugu tixgaliyo taageerooyin.

☐ Hoylaawe
☐ Qaxooti
☐ Baxsad

4 Dakhliga Guud ee Qoyska - Wa inaad sheegtaa DHAB AHAAN meeqa iyo inta goor.

Si cad u qor dakhliga. Si buuxda u madoobee goobada tusaysa inta goor ee dakhli la helo.
\Wiigiiba (W), 2 Wiigba/Laba Wiigba (E), Laba Goor Bishii (T), Bishiiba (M)

Magacyada Xubnaha Qoyska **Tax magacyada qoyska oo idil ay ku jiraan ardayga(du).**	Sanduuqan sax hadaan qoysku dakhli lahayn.	Dakhliga Guud Cashuur Kahor	Wiigiiba / Laba-Wiigba / 2 X Bishiiba / Bishiiba	Mucaawano (Welfare), Taageer Ilmood (Child Support), Masruuf (Alimony)	Wiigiiba / Laba-Wiigba / 2 X Bishiiba / Bishiiba	Hawlgabyo (Pensions), Shaqo Ka-fariisi (Retirement), "Social Security' ama kuwa kale	Wiigiiba / Laba-Wiigba / 2 X Bishiiba / Bishiiba
(TUSAALE) *Jane Smith*	☐	$ 199.99	(W) E T M	$ 149.99	W (E) T M	$ 99.99	W E T (M)
1)	☐	$	W E T M	$	W E T M	$	W E T M
2)	☐	$	W E T M	$	W E T M	$	W E T M
3)	☐	$	W E T M	$	W E T M	$	W E T M
4)	☐	$	W E T M	$	W E T M	$	W E T M
5)	☐	$	W E T M	$	W E T M	$	W E T M

Mucaawano Diidka (Refusal of Benefits)

☐ Sanduuqan sax hadaadan rabin in ilmahaagu mucaawano helaan.

ISTICMAALKA XAFIISKA OO KELIYA

5 Mucaawanooyin kale

☐ Anoo saxay oo saxeexay hoos, waxan u fasaxay DDB inay xogta arjigan siiyaan barnaamijyada nafaqaynta, caafimaadka iyo waxbaarashada si loo ogaado u qalnak barnaamij kasta.

Saxeexa

6 Saxeexa iyo Lambarka "Social Security"-ga

Waa in waalid amase koriye uu saxeexaa codsigan. Haddii la buuxiyo Qeybta 4, qofka weyn ee foomka saxeexayaa waa inuu liis-gareeyaa 4 ta lambar ee u dembeeya "Social Security" giisa amase uu calaamadeeyaa sanduuqa "Halkan calaamadi haddii aanad laheyn 'Social Security' lambar". (Fiiri weerta 'Privacy Act Statement eek u taalla boggan dhinaciisa kale).

Waxaan caddeynayaa (balan-qaadayaa) in dhammaan macluumaadka ku qoran codsigan uu yahay mid run ah oo dhammaan wixii dhakhli ahaa la soo sheegay. Waxaan fahamsanahay in dugsigu heli doono dhaqaale amase Fuundo Federaal ah oo lagu saleeyey macluumaadka aan bixiyo. Waxaan fahamsanahay haddii aan si ula kac ah u bixiyo macluumaad been ah, in uu ilmahaygu lumin karo taageerada raashin maalmeedka, oo anigana la maxkamddeyn karo.

X	XXX - XX -	☐ Ma haysto Lambarka "Social Security"-ga	/ / 201
Saxeexa Xubinta Madaxa Qoyska	Lambarka "Social Security"-ga		Taariikhda

Waalidka/Koriyaha Magaca Hore	Waalidka/Koriyaha Magaca Dambe	Telefanka Guriga	Telefanka Shaqada

0180566073
Cinwaanka Wadadda

Magaalada, Gobolka, Zip-ka

(ARJIGAN WAXBA LAGMA QABAN KARO HADAAN LA SAXEEXIN QAYBTA 6.)

WABIXINTA ARJIGA/CODSIGA

Gacaliye/Gacaliso: Dugsiyadda Dadweynaha ee Boston (BPS) waxay ka qayb-qaataan mashaariicda qaran ee qado- iyo quraac-siinta. Mashruucyadaas waxay kuu soo bandhigayaan in cunuggaagu sharciyan xaq u leeyahay inuu helo cunto lacag la'aan ah ama raqiisa iyo in kale. Caddeynta cidda xaqa u leh taa waxay ku xidhan tahay dakhliga reerka (qoyska). Waa muhiim inaad soo buuxiso, soona celisid arjiga lasocda warqadan. Qoys waliba waa inay soo buuxiyaan hal arji/codsi oo soo celiyaan (Cunugga aan cidna lahayn looma baahna in arji/codsi gaara loo buuxiyo). Qof ka tirsan shaqaalaha Hawlaha Cunnada iyo Quudinta (isagoo xeerarka maraya) ayaa caddeyn doona xaq u-yeelashada *muddo 10 maalmood* gudahood ah, kadib markuu soo gaadho codsigaagu. Markaa kadib waxaa lagugu soo wargelin doonaa natiijada codsigaaga amma inaad macluumaad dheeraada soo gudbiso. Haddaad u baahato buuxinta codsiga in lagaa caawiyo ama wax su'aala aad qabto, fadlan soo wac 617-635-6371 ama 617-635-6372.

Waxaa suurtogal ah in cunuggaagu helo cunto lacag la'aan ah ama raqiisa haddii waxa idin soo galaa le'eg yihiin ama ka hooseeyaan sida ku cad tusmadan hoose. Waxaa sidoo kale suurtogal ah in cunto lacag la'aana caruurtaadu hesho idinkoo waliba qaata SNAP (fuudh istaambis) ama TAFDC (Lacagta Cayrta), iyadoon loo eegin dakhliga idin soo gala ee ay tusmadan hoose caddeyneyso.

Qodobeynta Xaq u yeelashada Cuntooyinka Ee aad helavsid 2011-2012

Tirada Reerka	Sanadkii	Bishii	Todobaadk
1	20,147	1,679	388
2	27,214	2,268	524
3	34,281	2,857	660
4	41,348	3,446	796
5	48,415	4,035	932
6	55,482	4,624	1,067
7	62,549	5,213	1,203
8	69,616	5,802	1,339
Qofkii kale dheerada:	7,067	589	136

Qiimaha Cuntadda ee Sanadkan

Nooca Cunada	Qiimaha buuxa	Dhimid
Quraac:	$1.50	$0.30
Qadada Dugsi / Hoose:	$2.25	$0.40
Dugsi / Dhexe iyo Sare:	$2.50	$0.40

Xaqa Go'aan qaadashadda

Hab-dhaqanka loogu magac daray Richard B. Russel, waxa uu xusayaa si dhammaystiran loo buuxiyo arjiga/codsiga. Waa muhiim inaad arjiga si dhammaystiran u soo buuxiso. Haddii kale, uma oggolaan karno cunuggaaga inuu helo cunto lacag la'aana ama qiimaheedu jaban yahay. Waa inaad soo raaciso afarta lambar ee ugu danbeeya sooshal lambarka qofka soo saxiixay arjiga/codsiga. Looma baahna afartaa lambar ee sooshal lambarka haddii cunugga wax loo doonayaa yahay cunug cid la'aana ama aad soo gudbiso lambarka fuudh istaamka (SNAP) ama kan lacagta caydha (TAFDC) ama qofka reerka ka mas'uulka ahi haddaanu lahayn sooshal lambar. Warbixinnadaada waxaannu ku ogaanaynaa oo keliya in cunuggaagu xaq u leeyahay cunto bilaash ah amma qiimaheedu jabanyahay iyo inkale---iyo annaga oo ka maamul ahaan meel marinayna shuruucda u dejisan hawlaha qada- iyo quraac-siinta. **Waxaa laga yaabaa in aannu la wadaagno xaqa warbixinnadaada Laanta Waxbarashadda, Caafimaadka, hawlaha quudinta si ay u qiimeeyaan, oo ay lacag ugu doonaan Programkan iyo qiimeynta inuu faa'iido leeyahay mashruucani iyo inkale, iyo kuwa dabagalaya lana xisaabtamaya mashruuca iyo saraakiisha sharciyadda si ay uga baaraan wax xad-gudub ah oo lagu sameeyo xeerarka mashaariicdaas.**

Caddeynta in aan dadka la kala Soocin

Halkan waxaannu kuugu sharraxeynaa wixii aad sameyn lahayd haddii aad dareento in laguula dhaqmay si aan xaq ahayn. "Si waafaqsan Xeerka Dawladda Dhexe iyo Waaxda Beeraha ee Mareykanka, hay'adani waxay mamnuucday in dadka lagu kala sooco qawmiyad, midab, wadankuu dhalasho ahaan kasoo jeedo, rag ama dumar midkaad tahay, da', ama qof awood-dhiman. Haddaad dareento in laguugula dhaqmay Cunsurinimo waraaq cabasho u dir USDA, Darector, Office of Adjudication, 1400 Independence Avenue, SW. Washington D.C. 20250-9410 ama lambarkan lacag la'aanta ah ee (866) 632-9992 wac. Dadka dhegaha wax ka qaba, ama hadal aan kari karin wuxuu USDA kala xiriirayaa Federal Relay Services (waa qalab dadkaa loogu talogalay) (800) 877-8339, ama (800) 845-6136 (Isbaanish dadka ku hadla). USDA si siman ayey wax ugu qabataa uguna shaqeysaa dadkoo dhan."

Dugsiyada Dadweynaha ee Boston
Waaxda Cunnada iy Nafaqaynta
Tilmaamaha Arjiga Raashinka ama Cunnada

Gacaliye/Gacaliso:

Caruurtu waxay u baahan yihiin inay bartaan cuntooyinka nafaqadda leh. ***Dugsiyadda Dadweynaha ee Boston*** *waxay bixiyaan cunto nafaqo leh maalinkasta. Quraacdda oo qiimaheedu yahay* ***$1.50****; Qadada oo iyana ah,* ***$2.25 kuwa dhigta dugsiyadda hoose,*** *iyo* ***$2.50*** *oo laga bixiyo ardeydda dhigata dugsiyadda dhexe iyo sare. Waxaa dhici karta in cunugaagu shuruuddo ahaan buuxin karo in la siiyo cunto lacag la'aana ah ama laga dhimo qiimaha caadiga ah sida: Quraacda oo kale qiimo dhimis gaareysa* ***.30*** *iyo qadada oo laga dhimo* ***.40.***

Minfadlag buuxi " Arjiga Caawimaada cuntadda" si aad u aragto in cunugaagu buuxiyey shuruudaha uu ku heli karo cunto lacag la'aan ah ama ka jaban qiimaha caadiga ah. Ma aqbali karno arji aan lasoo wada buuxin, markaa iska hubi inad si buuxda u soo wadda buuxisay akhbaaraadka lagaa rabo. Kadib ku sooceli arjigaaga oo aad soo buxisay, dugsiga cunugaagu dhigto.

Su'aalaha iyo jawaabaha ku saabsan arjiga cuntadda

1. **Hadaan buuxiyey arji sanadkii hore.** Miyaan u baahnahay sanadkana mid kale inaan buuxiyo? **HAA!** Waa khasab in sanad walba arji cusub la buuxiyo.

2. Hadii cunugaagu xaq u leeyahay cunto lacag la'aan ah ama qiimo jaban bisha June ee sanad-dugsiyadeed walba, waxaa u sii soconkarta in uu helo cuntadaas lacag la'aanta ah ama raqiiska ah mudo ***dhan 30ka maalmood ee ugu horeysa*** furnaanshaha sanad-dugsiyadeedka. Marka aad sanadka cusub soo arjigaaga/codsigaaga soo gudbisid, waxaad heli doontaa waraaq ka hadleysa xaalada cunugaaga ee sanad-dugsiyadeedkaa cusub. Hadii xaalada cunugaagu ay ka duwanaato tii sanadkii hore; waxaa u kordhaya mudo 24 saac ah faa'iidada caawimaada, ama way ka yaraaneysaa muddo 10 cisho oo la shaqeeyo dhexdood, kadib marka arjigaaga/codsigaaga ka shaqeyntiisu bilaabanto.

3. Hadii cunugaagu aanu ku jirin dugsiyada dadweynaha ee Boston sanadkii hore, deg-deg noogu soo celi arjigaaga. Ilaa aanu hawshayada ka qabsaneyno arjigaaga/codsigaaga, cunugaaga waxaa laga rabaa inuu qiimaha caadiga ah Cuntada ku iibsado.

4. **Haddii hal cunug kabadan aan leeyahay. Ma waxaa la iga rabaa mid walba inaan arji gaara usoo buuxiyo?** Maya. Minfadlag u wadda isticmaal ardeydda gurigaaga oo dhan hal arji/codsi oo qura.

5. **Yaa xaq u leh inuu helo cunto lacag la'aan ah?** Qoys walba caruurta hesha **Kaalmada Mashruuca Gargaaridda iyo sare. Cuntadda nafaqeysan- SNAP ama TAFDC** waxay heli karaan cunto lacag la'aan ah iyaadoon loo eegin lacagta soo gasha qoyska. Sidoo kale caruurtaaddu way heli karaan cunto lacag la'aan ah haddii lacagta idin soo gasha qoys ahaan ay waafaqsan.

6. **Ma heli karaan cunto lacag la'aan ah caruurta aan cidna lahayni?** Haa, caruurta Cidna aan lahayn ee ay hayaan /sharciyana ay mas'uul ka yihiin Hay'adaha caruurtaa cid la'aanta ah xanaaneeya ama maxkamadi jideysay ama u socoto xaq bay u leeyihiin inay helaan cunto lacag la'aan ah. Cunug kasta oo aan cid-lahayni oo reer la jooga xaq buu u lee yahay cunto lacag la'aan ah, iyadoon loo eegin inta lacag soo gasha reerkaa, waxaana loo tixgelinayaa inuu reerkaa ka tirsan yahay tiro ahaan. Sikasta oo ay tahay qofka waalidka ahi ama ka mas'uulka ahi waa inuu ku sheegaa arji codsiga ah isagoo calaamadda **X** ku qoraya lambarka **1** (dhinaca bidig-shishe) ee codsiga ama arjiga.

7. **Ma heli karaa cuntada lacag la'aanta ah cunug guri aan qabin/reerkoodu isaga tagey oo ka cararay?** Haa. Minfadlag wac **Mary William, BPS Homless Liason telefoonka ah 617-635-8037,** si aad u ogaato in cunugaagu u qalbo, markaa haddii Markaa hadii aan taa lagugu soo wargelin cunugaasi wuxuu helidoonaa cunto bilaasha.

8. **Yaa xaq u leh inuu cunto qiimaha caadiga ah ka jaban helo?** Cunugaagu waa uu heli karaa cunto ka raqiisan tan caadiga ah, haddii lacagta reer ahaan idin soo gashaa, waafaqsan tahay xaddiga iyo tusmada dawladda dhexe u goysay ee cunug ku heli karo cunto ka raqiisan qiimaha caadiga ah. (Wac kafateeriyadda ama maqaayadda dugsiga ama Waaxda Codsiyada Cuntada kana wac 617-635-6371 ama 617-635-6372 si akhbaar dheeraada aad uga hesho).

9. **Waxaan ka helay "Shahaado Ogeysiin Toosa" BPS bishan Agoosto, taasoo oraneysa cunugaagu wuxuu buuxiyey oo xaq u yeeshay inuu helo cunto lacag la'aan ah. Miyaa weli la iiga baahan yahay inaan arjiga codsiga ah soo buuxiyo?** Maya, uma baahnid inaad arjigaa codsiga ah soo buuxiso. Minfadlag si taxadir leh u akhriso waraaqda kuu timi ee aad heshay, meelna ku xafido waa intaasoo su'aalo kaaga yimaadaan wakhtiyada soo socda ee. Dugsiga cunugaagu dhigto ayaa ku soo ogeysiinaaya haddii cunugaagu shuruudihii buuxiyey iyo in kale. Si kastoo ay tahay hadaad war dheeraada u baahato minfadlag soo wac **Waaxda Hawlaha Cuntooyinka** qabilsan kana soo wac lambarka ah 617-635-6371 ama 617-635-6372.

10. **Waxaan helaa WIC. Ma heli karaa cunugeygu cunto lacag la'aan ah?** Caruurta qoyskoodu helo WIC xaq bay u yeelan karaan cunto lacag la'aan ah ama mida qiimaheedu raqiiska yahay. Minfadlag soo buuxi arjiga/codsiga.

11. **Ma-lihi lambarka dawladda dhexe ee bulshadda (Social Security Number). Ma-heli karaa cunugeygu cunto lacag la'aan ah ama cuntadda qiimaheedu raqiiska yahay?** Haa. Sikastoo ay tahay, waa inaad isku-talaab ku dhex-dhigtaa sanduuqa lambarkiisu yahay **6** ee arjiga/codsiga kasoo dhahaaya "Ma-lihi Social Security Number."

******Sharciga dawladda Dhexe ee cusubi uma baahna in lawada qoro Social Security Lambarka oo dhan, markaa waa inaad qortaa afarta lambar ee ugu danbeysa******

12. **Miyaa la baarayaa akhbaarta aan kusoo buuxiyey arjigeyga?** Haa, Dugsiyadda dadweynaha ee Boston (BPS) shaqaalaha Cuntadda iyo Quudinta Wanaagsani waxay fiirinayaan oo baarayaan qaybo kamida araajidda sanad walba lasoo buuxiyo ee loo soo gudbiyo. Hadduu arjigaagu kuwa la baarayo ka mid noqdo, waxaa lagu soo weydiinayaa cadeymaha lacagta qoys ahaan idin soo gasha, ama akhbaaraadka kale ee aad arjigaaga ku soo buuxisay/gudbisay.

13. **Hadii shuruudaha iminka aanan soo buuxinin, gadaal/mudo kale ma soo codsan karaa?** Haa. Waad soo codsan kartaa inta sanad-dugsiyadeedku socdo/furan yahay hadii tiradda qoyskaagu kororto, ama lacagta idin soo gashaa yaraato, ama aad heshaan Mashruuca Kaalmeynta Sare u qaadida Quudinta hagaagsan-**SNAP, TAFDC,** ama wixii kale ee laydinku caawiynayo ee idin soo gala. Hadaad shaqadaada weydo, caruurtaaddu waa suurta-gal inay helaan cunto lacag la'aan ah, ama raqiisa.

14. **Hadii arjigeyga/codsigeyga aan ku codsanayo cunto lacag la'aan ah ama raqiisa la diido, aniguna diidmadaa aanan ku qanacsaneyn, maxaa ii furan inaan sameeyo?** Hadii Go'aankaa diidmadda aadan ku qanacsaneyn waxaad soo codsaneysaa dhageysi maxkamadeed oo kale adigoo soo wacayaa ama qoraal u soo diraaya, taleefonka iyo cinwaanka hoose.

    BPS Department of Food & Nutrition Services (Waa Cinwaan ku-meel-gaara)
    Higginson Building
    160 Harrishof Street
    Roxbury, MA 02119
    617-635-9144

15. **Hadii qof qoyskeyga kamid ihi aanu dhalashada Mareykanka lahayn.** Weli ma usoo codsan-karaa cuntada lacag la'aanta ah ama qiimaha raqiiska ah cunugeyga? Haa. Maaha khasab adiga ama cunugaagu inaad haystaan dhalashada Maraykanka si aad u buuxisaan shuruudaha lagu helayo cuntadda lacag la'aanta ah ama raqiiska ah.

16. **Waa kuwama dadka aan ku darayaa inay qoyskeyga ka mid yihiin?** Waa inaad ku dartaa dhamaan dadka gurigaaga ku nool, haba noqdaan kuwo aad qaraabo tihiine sida (Awoowe/Ayeeyo, qaraabo kale, ama saaxiibo). Waxaad kaloo ku dareysaa liiska kuwii aan dhalashadda Maraykanka haysanin. Waxaa kale oo lagama-maarmaan ah inaad adigu isku darto iyo caruurta kula nool oo dhan. Hadii aad la nooshahay dad iyagu dhaqaalo ahaan kaa madax-banaan (Tusaale, kuwo aadan wax siinin ama dhaqaale ahaan taageerin, oo aan wax ku soo gala kula wadaagin adiga iyo caruurtaada oo kharajkooda baxsadda wixii ku soo hagaaga waxa aad wadaagtaan sida kirada iwm, haku soo darin.

17. **Ka warama hadii waxa isoo galaa aanay mar-walba isku mid ahayn oo is-bed-bedasho?** Qor inta caadiyan ku soo gasha sida qaalibka ah. Tusaale, hadaad hesho bil walba $1000, oo shaqadii maalmo aadan tagin/qaban sababtaa awgeedna wixii ku soo galayeen noqdeen $900, ku qor $1000 inaad bishii heshid oo ay ku soo gasho. Sida badan hadaad saacado dheeraada shaqaysid ku qor, hadey mar-mar dhifa tahayna ha-ku-qorin.

18. **Waxaanu kamid nahay ciidamadda. Miyaanu ku darnaa lacagta lanoo siiyo inaanu guriga isaga bixino?** Hadii lacagtaa laguu siiyo xero-ka-maqnaanshiiyo, waa inaad igu dartaa sidii wax ku soo gala oo kale. Si kasta ha

ahaatee, hadii lacagtaasi ay tahay mida lagu horumarinaayo ciidamaddu inay guro ay iska lee yihiin helaan, ka ku darin lacagta laguu siiyo inaad guri isaga bixiso.

19. **Hadii Xaaskeygu/Ninkeygu ciidamada yahay/tahay oo goob dagaal oo dibadda ah ku maqan yahay. Miyaan ku darayaa lacagtaa halkaa uu jiro/jirto ku qaato waxa nasoo gala?** Maya, lacagta halkaa uu/ay ku qaato/qaadato hadii aanay dheeraad ku ahay muashaharkiisa/keeda caadiga ah (sida habeen-dhaxa) kuma dareysid waxa uu/ay dibada ku qaato/qaadato. Macluumaad dheeraadda la xidhiidh dugsigiina.

20. **Hadii qoyskeygu caawimaad dheerada u baahan yahay. Ma jiraan mashaariic dheeraada oo aanu codsan-karno?** Si aad u hesho inaad codsato Mashruuca Sare u Qaadida Cuntada Tayeysan (SNAP) ama fursadaha caawimeed ee jira, la xiriir sarkaalka qaabilsan caawimaada ee degmadiina ama wac taleefgonka ah (1-866-950-3663).

Hadii aad qabto wax-su'aal ah oo kale ama aad rabtid in lagaa caawiyo buuxinta arjiga/codsiga, ka wac Waaxda Cuntada iyo hawlaha quudinta Nafaqeysay lambarada ah 617-635-9144/6371/6372 si ay kuu cawiyaan.

Sida Aad U Buuxinlahayd Arjiga Cunnada

Arjiga/codsiga "Reerku ay ku codsanayaan ka-faa'ideysiga cuntadda" waxa kala soocaya mashiin. Si looga shaqeeyo arjigaaga si dhakhso ah, minfadlag akhri sidan hoose oo ah qaabka ugu sahlan ee loo buuxiyo arjiga/codsiga.

STOP Hadii aad ka heshay dugsiga caruurtaadu dhigato ***Waraaqda cadeynta tooska ah,*** tasoo ka hadleysa Cuntada lacag la'aanta ah, uma baahnid inaad buuxiso arjiga ama codsiga. Laakiin u ogoloow dusigu Inuu ogaado hadii qof caruurtaada ka mid ahi aanu ku qoreyn waraaqdaa aad dugsiga ka heshay.

1. Akhri warbixinta iyo tusaalooyinka ku qoran waraaqda dhabarkeeda iyo buuga yare e la socda, kasoo Kuu fududeynaaya inaad si sahal ah u fahamto buuxinta arjiga. Sida loo buuxinayo waxaa laguugu turjumay luqadaha kala ah **(Ingiriisi/Isbaanish oo wada-jira, Burtiqiis,Heeyti/Kiriyool, Keeb feerdiyaan, Jaynees, Fiyadnaameys, iyo Soomaali)**. Hadii aanu arjigani ku qornayn luqadaada aad ku hadasho, minfadlag la xiriir dugsiga cunugaagu dhigto ama Waaxda Cuntada iyo Shaqooyinka Nafaqeynta si ay kuu caawiyaan, kana wac teleefoonka ah 617-635-6371 ama 6372.

2. Hadii aadan daneynaynin ama doonaynin inaad heshid cunto lacag la'aan ah ama raqiisa, minfadlag ku cadee taa qaybata lambarka **4**, isla markaa kusoo celi dugsiga cunugaagu dhigto.

3. Sida aad u buuxineyso waraaqda codsiga, MINFADLAG
   a. Isticmaal qalin madow **(hana isticmaalin qalan qori).**
   b. U-qor si waafaqsan xeerarka qoraalka.
   c. Isticmaal FAR-WAAWEYN.
   d. Midfadlag si buuxda oo la arki karo ugu muuji sanduuqa.



4. Hadii aadan warbixinta lagu soo weydiiyey aanad ku buuxin Karin inta kaaga banan waraaqda, keliya Qor intii suurtogal kuu ah.

5. Minfadlag **wax waraaq ah oo kale haku lifaaqin ama haku dhajin** arijiga/codsiga.

6. Far waaweyn ku qor cunugaaga/cunugyadaada Magaca Awoowgood, Magaciisa/ceeda, iyo kan aabbaha Oo xarafka hore uun aad qoreyso, Lambarka ardeyga, Fasalka, Magaca Dugsiga, calaamadeena **Lambar 1,** hadii cunuga aad wax u dooneysaa aanu heysanin cidna.

7. Cunuga aan cid lahayni waxaa haya oo xananeeya gobolka aad ku nooshihiin. Gobolka loogama baahna Inay u soo buuxiyaan arji gaara caruurta cid la'aanta ah ee ku jira tirade reerka.

8. Qoysaska/ardeyda qaadata faa'iidooyinka laga helo **TAFDC/SNAP**: Hubi inaad ku qorto lambarkaga **SNAP ama TAFDC** lambarka **2** ee arjiga. (Lambarkani waa kan hay'adahaasi ku siiyeen kasoo ku Geeska bidig ee xaga sare ee ku yaal waraaqda cawimada aad ku hesho).

9. Hoylaawe/Qaxooti/Baxsad lambarka **3**: Hadii ilmaha aad u dalbaysaa yahay Hoylaawe, Qaxooti, ama Baxsad, ku qor X sanduuqa laguu tilmaamay ee arjiga ama Ka wac Mery William telephonka ah 617-635-8037.

10. **Soo gudbinta waxa kusoo gala:** shuruud buuxinta helida cunto lacag la'aan ah ama raqiisa waxay ku Xidhan tahay soo gudbinta bil walba ee waxa soo gala reer walba. Minfadlag tax oo qor wixii idin soo Gala sida: mushaharka, gunooyinka, baqshiishka, lacagta aad ku hesho banaanbax shaqo joojin, lacagta Lagu siiyo marka shaqada lagaa joojiyo, shaqaale ahaan wixii ku soo gala,lacagta aad xoogsato, ta Ganacsi aad leedahay kaasoo gala ama beer,hawl-gabka noocay ahaataba,sooshaal sikuuritiga, iyo wax-ala-wixii kusoo gala marka aan laga goynin canshuurta kuna cadee **lambarka *4* ee arjiga.**

11. **Lambarada (4, 5, iyo 6)**: Ku qor cid kasta oo reerkaaga ah, wax lacag ahi hasoogasho ama yaanay soogeline. Adiga, cunuga aad wax u dalbaneyso, iyo caruurta kale oo dhan, ninkaaga/xaaskaaga, awoow/ayeeyo Iyo cidii kale ee idinla nool. Isticmaal waraaq kale hadaad ka-maarmi weydo.

12. Qor qof walba oo reerka ah waxa soo gala ama uu helo, inta aan canshuurta laga goyn, isla markaa cadee Lacagtaasi meesha ay kasoo gasho qofkaa sida mushar shaqo,cawimaada dawlada,hawlgabnimo iwm. Cadee xiliyadda lacagtaasi kusoo gasho sida: ***Todobaadle (W), Labadii todobaadba (E), 2 goor bishii (T), ama bishiiba mar (M).***

13. Hadii aadan **faa'iidooyinkan** minfadlag calaamadee saduuqa **lambarkiisu yahay 4** ee arjiga/codsiga

Arjigaaga/codsigaaga hadii aanay la socon 4 ta lambar ee ugu danbeeya sooshal lambarkaaga iyo saxiixaaga lama aqbalaayo. Hadii aadan lahayn sooshiyaal lambar,minfadlag calaamadee sanduuqa ah " Ma lihi SSlambar" oo lambarkiisu yahay 6.

Waaxda Cunnada ee Dugsiyada Dadweeynaha Boston
Tilmaamaha Dakhliga iyo Qiimaha Cunnada

Qodobeynta Xaq u yeelashada Cuntooyinka Ee aad helaysid 2011-2012			
Tirada Reerka	Sanadkii	Bishii	Todobaadk
1	20,147	1,679	388
2	27,214	2,268	524
3	34,281	2,857	660
4	41,348	3,446	796
5	48,415	4,035	932
6	55,482	4,624	1,067
7	62,549	5,213	1,203
8	69,616	5,802	1,339
Qofkii kale dheerada:	7,067	589	136

Qiimaha Cuntadda ee Sanadkan		
Nooca Cunada	Qiimaha buuxa	Dhimid
Quraac:	$1.50	$0.30
Qadada Dugsi / Hoose:	$2.25	$0.40
Dugsi / Dhexe iyo Sare:	$2.50	$0.40